



Cabot Primary School



Talaada 1<sup>da</sup> Sibtember 2020

Gacaliyayaal Waalidiin iyo Daryeelayaal,

Waxaan rajeynayaa in carruurtaada ay ku raaxeysteen fasixii Samarka.

Qoraalkaan wuxuu la xiriiira caddeyn la xiriirta qorshooyinka dugsiga billowgiisa ee Xilligaan, waxaan raacnay hagidda Qeybta Waxbrashada iyo talada Guddiga Deegaanka si aan si nabdoon ugu horumarinno furitaanka dugsiga anaanagoo isticmaaleyna qiimeynta khatarta. Tan waxaa laga heli karaa websaydka.

<https://www.gov.uk/government/publications/actions-for-schools-during-the-coronavirus-outbreak/guidance-for-full-opening-schools>

<https://www.cabot.bristol.sch.uk/covid-19/school-updates/>

### Imaanshaha

Talada dowladda ee ahayd in dugsiga loo xiro ardayda oo dhan 20<sup>kii</sup> Maars qeyb ahaanna dib loogu furo 1<sup>da</sup> Juun 2020. Waxaan hadda diyaar u nahay inaan ardayda oo DHAN ku soo dhaweyno dugsiga laga billaabo maalinta Jimcaha 4<sup>ta</sup> Sibtember 2020, taasoo ku xiran in ay dhammaantood caafimaad qabaan. Haddii canuggaada ama cid kale oo ka mid ah qoyskaada lagu arko calaamadaha Covid 19, (qunfac cusub oo joogto ah ama xummad sarreysa, lumitaan ama is-beddel dareemayaasha dhadhanka ama urinta (anosmia)), fadlan **HA U SOO DIRIN** dugsiga. Waa inaad raacdaa hagitaanka 'guriga joog' ee qoysaska laga yaabo ama la xaqiijiyey in ay qabaan caabuqa coronavirus (COVID-19), taasoo tibaaxaysa in ay tahay in ay is-xakameeyaan ugu yaraan 10 maalmood ayna qorsheeyaan in ay sameeyaan tijaabo (test) si ay u ogaadaan in ay qabaan coronavirus (COVID-19) iyo in kale.

<https://www.nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/check-if-you-have-coronavirus-symptoms/>

<https://www.nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/testing-for-coronavirus/ask-for-a-test-to-check-if-you-have-coronavirus/>

Bristol hadda waxay leedahay xarunteeda u gaarka ah ee tijaabada oo ku taal Victoria Rooms ee St Paul's Road. (Netham sidoo kale). Marka aad wacdid xarunta tijaabada waxaa laga yaabaa inaad awoodid inaad ballan sameysatid ama in guriga laguugu soo diro qalabka tijaabada.

<https://news.bristol.gov.uk/news/bristol-city-centres-first-covid-19-testing-site-open>

### Kooxeyn (Bubbles)

Fasal walba si gaar ah ayaan koox ugu sameyn doonaa taasoo macnaheedu yahay in fasallada ay isku darsameynin. Tan waxaa ku jirta waqtiyada qadada iyo ciyaaraha. Shaqaalaha qaarkood ayaa laga yaabaa in ay la shaqeeyaan laba fasal laakiin tirada fasallada intaas kama badnaan karto. Fasal walba waxaa dhigan doona ilaa 30 arday. Ardayda isku kooxda ah ma kala fogaan doonaan, laakiin waa in ardayda isku kooxda ah ay gaarin ardayda kooxaha kale.

### Nadaafadda

Waxaan ardayda weydiisaneynaa in ay gacmahooda si joogta ah u dhaqaan. Mararka qaar waxaan weydiisan doonaa in ay isticmaalaan gacmo-nadiifiyayaal intii ay isticmaali lahaayeen saabuun iyo biyo. Waxaa kaloo aan weydiisan doonaa carruurta in aysan wadaagin qalabka intii macquul ah. Fadlan carruurta dugsiga ha u soo dirin iyagoo boorso iyo qalab kale wata.

### Imaansha iyo Kaxeeynta

Si saxmadda looga yareeyo albaabada dugsiga, waqtiyada imaanshaha iyo kaxeeynta waa loo kala duwi doonaa qoysaska kala duwan. Waxaa lagu soo diri doonaa waqtiga imaanshaha ee qoyskaada. Fadlan imoow waqtigaan sugna in uu kula kulmo xubin ka mid ah Kooxda Hoggaaminta ee Sare. Carruurtaada dugsiga ayey geli doonaan laakiin waalidiinta iyo daryeelayaasha waa in ay carruurta ku macsalaameeyaan albaabka. Waxaa kaloo lagu siin doonaa waqti cayiman ee qoyskaada uu carruurta soo kaxeysan karo. Fadlan dugsiga imoow waqtiga lagu cayimay. Waxaa kula kulmaaya xubin ka mid ah shaqaalaha dugsiga kaasoo u oggolaan doona waalidiinta iyo daryeelayaasha in ay soo galaan dugsiga waqtiyo kala duwan. Waxaad awoodi doontaa inaad raacdo hab-hal-jidle-ah dugsiga dhexdiisa si aad carruurtaada uga soo kaxeysato fasallada. Fadlan fiiri calaamadaha ku xeeran dugsiga kuwaasoo kuu tilmaamaaya meesha aad u socotid. Marka aad carruurtaada kaxeysatid waxaad u baahan doontaa inaad ku sii socotid habka-halka-jid-ah dugsigana uga baxdid dhanka istuudiyaha (Studio). Waxaa jiri doona shaqaale kaa caawiya hagidda dugsiga dhexdiisa. In kastoo ay khasab ahayn, waxaa laga yaabaa inaad dooneysid inaad wejiga daboolato waqtiyadaas

Learn together, respect each other, achieve forever

Headteacher Tom Burton Halston Drive, St Pauls, Bristol, Bristol BS2 9JE

Tel: 0117 3772630 Email: Cabotp@bristol-schools.uk Web: wwwcabot.bristol.sch.uk





## Cabot Primary School

### Weji dabooshada

Talada hadda taagan waa in carruurta da'doodu tahay 11 jir ama ka yar ay u baahneyn in ay wejiga dabooshaan. Haddii canuggaada uu wejiga daboosho dugsiga dhexdiisa waa inuu isaga bixiyaa si nabdoon (isagoo aan taabaneynin qeybta ku daboolan afka iyo sanko) marka uu dugsiga yimaado uuna ku xafidaa bac balaastik ah oo daboolan ilaa laga gaaraayo waqtiga guriga. Weji-daboolayaasha la tuuro waa in hal mar oo keli ah la isticmaalaa loona tuuraa si nabdoon marka la isticmaalo.

### Xiriirka dugsiga

Ma awoodi doontid inaad fasallada gasho ama aad macallimiinta la hadasho billowga maalinta. Xiriirka maalinlaha waa inuu ahaadaa mid taleefan ama e-mail wadareed ah.

### Shakiga xaaladaha Covid 19

Haddii canuggaada lagu arko calaamadaha Covid 19 inta uu dugsigu joogo, si degdeg ah ayaan kuu soo wici doonaa si aad u timaadid aadna canuggaada guriga ugu kaxeysid. Aad ayey muhiim u tahay inaan haayno maclumaadka xiriirka ee ugu dambeeyey (cusub) si aan kaala soo xiriirno. Marka aad canuggaada kaxeysid waxaan kula socodsii doonaa talada aad raaceysid ee ku saabsan xaaladaha shakiga taasoo ay ku jirto is-xakameyn canuggaada iyo qoyska iyo qorsheyn tijaabo ee canuggaada (fadlan fiiri **Imaansha** korkiisa wixii akhbaar dheeri ah). Fadlan noola socodsii jawaabta ka soo baxda tijaabada si degdeg ah. Haddii tijaabada sheegto in canugga uu qabo Covid 19, waxaan u baahannahay inaan wargelinno shaqaalaha iyo ardayda uu canugga la joogay si ay iyagana isu-xakameeyaan isuna tijaabiyaan.

### Naadiyada Quraacda iyo dugsiga ka dib

Naadiyadaan lama sameyn doono Xilliga 1. Waxaan rajeyneynaa inaan awoodi doonno inaan mar kale billoowno marka xaaladda ay noo saamaxdo.

### PE

Waa sii wadi doonaa inaan bixinno casharrada PE. Carruurta waxaa ay u soo qaadan karaan dugsiga dharka PE maalmaha ay leeyihiin PE si loo baajiyo in ay qalab kale dugsiga la yimaadaan.

### Qadada

Fadlan fiiri akhbaarta cusub ee qadada dugsiga, gadashada Dharka Dugsiga, gadashada dharka PE iwm.

### Manhajka Soo-Kabashada

Inta lagu jiro Xilliga hore, waxaan hirgelin doonaa Manhajka Soo-Kabashada. kan waxuu diiradda saaraayaa sama-ku-nagaansha carruurta. Waxaan rabnaa inaan carruurta u suuragelinno in ay la wadaagaan waaya-aragnimadooda la xiriirta bilihii la soo dhaafay iyo inaan si tartiib ah dib ugu dhiirragelinno hab-dhaqanka waxbarashada. Tan waxaa wehliya ogaanshaha kala-go'a xirfadaha muhiimka iyo cilmiga iyo sidii wax looga qaban lahaa iyo wadaagidda iyo u dabbaldegga xirfadaha cusub ee aan kororsannay intii waxbarashada ay ka dhaceysay guriga. Waxaa intaas dheer, waxaan carruurta si qasdi ah u bari doonaa sida loogu nagaado si nabdoon, isticmaalka nadaafad wanaagsan iyo nolol maalmeedkeenna dugsiga ee cusub si ay carruurta u nabdoonaadaan waqtigaan aan xaaladda la hubin.

Waqtigaan waa mid aan caadi noo ahayn dhammanteed. Waxaan si dhab ah u dhawraayaa inaan dhammaantiin idiin arko mar kale aanna wada shaqeyno si aan carruurtaada uga caawinno in ay helaan fursad ay ku helaan waxbarashada ugu wanaagsan ee macquulka ah taasoo lagu soo gudbinaayo hab-nabdoon. Haddii aad wax su'aalo ah aad qabtid ee ku saabsan qorshaheenna, fadlan soo wac xafiiska si aad ballan ugu dhigato inaad ila hadashid.

Mahadsanid,

Tom Burton  
Madaxa-Macallimiinta



Learn together, respect each other, achieve forever

Headteacher Tom Burton Halston Drive, St Pauls, Bristol, Bristol BS2 9JE

Tel: 0117 3772630 Email: Cabotp@bristol-schools.uk Web: wwwcabot.bristol.sch.uk

